

Tallaalka fayrusta koroonaha

– Comirnaty (BioNTech iyo Pfizer)

Fayrusta koroonahu waxay keenta xanuun ku dhaca marinnada hawada. Dad badan waxba ma dareemaan ama calaamado khafiif ah ayey dareemaan, laakiin dadka qaar ayaa si halis ah ugu xannuunsada. Dadka waayeelka ah iyo dadka qaba cudurrada qaarkood ayaa u sii nugul inay aad u xanuunsadaan ama geeriyoodaan. Tallaalku wuxuu qofka ka difaacayaa inuu si halis ah ugu xanuunsado cudurka koroonaha.

Halkee laga heli kara tallaalka fayrusta koroonaha?

Dadka jooga Norway ayaa heli kara tallaalka koroonaha ee ka mid ah barnaamijka tallaalista ee qaranka. Qaadashada tallaalku waa bilaash, waana ikhtiyaar.

Halkee ayaan ku qaadan karaa tallaalka?

Eeg macluumaadka ku jira bogga internetka degmadaada si aad u ogaato dadka la siinayo tallaalka, qaabka loo bixinayo tallaalka iyo xilliyada.

Qaabkan ayey tallaalistu u dhacaysaa

Tallaalka waxa lagu mudayaa cududda (gacanta qaybta kore). Intaan lagu tallaalin waxa lagu weydiin doonaa inaad caafimaad qabto, iyo in falcelin (dhibaato) kaaga timi tallaalo hore oo aad qaadatay. Xasuuso inaad sheegtid haddii cudurka koroonuhu kugu dhacay ama aad hore u qaadatay tallaalka koroonaha, haddii aad uur leedahay, aad qabto xasaasiyad, isticmaasho dawooyin ama aad qabto dhibaatooyin caafimaad oo kale. Raac tilmaamaha ku saabsan tirada irbadaha iyo wakhtiga u dhaxaynaya ee khuseeya dadka aad ka tirsan tahay. Arrintani waxay caawinaysaa dadka ka shaqaynaya goobta tallaalka ee kuu shaqaynaya. Waa muhiim in aad irbadaha qaadatid wakhtiga lagu qabtay. Waa wax caadi ah in tallaalka dib loo dhigo haddii xanuun degdeg ah ku yimaado qofka ama uu qabo qandho ka badan 38 digirii. Tallaalka ka dib waxa lagaa codsan doonaa inaad goobta tallaalka joogto ugu yaraan 20 daqiiqo.

Sidee tallaalkani u shaqeeyaa?

Tallaalku wuxu ka kooban yahay tilmaanta habka loo sameeyo (farriin-side-RNA) qodxaha caadiga ah ee ku yaala fayrusta koroonada. Taasi waxay keenaysaa in jidhku samaynayo qodxo koobi ah oo aan khatar ahayn oo markaana difaaca jidhku ku tababarar karo. Qaabkaas ayuu jidhku ku baranayaa aqoonsiga iyo iska difaacista fayrusta koroonada ee runta ah haddii uu qaado fayrusta. Farriin-sidaha-RNA ee la socda tallaalku waxa uu si degdeg ah u burburayaa isagoo wax saamayn ah ku yeelan hido-sidaha. Tallaalku ma wato fayrus nool mana keeni karo infekshanka koroonada. Tallaalka koroonadu wuxu samaynayaa ka hortag. Ma daweyn karo xanuun koroono ah oo uu qofku qabo.

Intee le'eg yahay waxtarka tallaalku?

Tallaalku wuxuu difaac ka yahay xanuunka daran ee ka imanaya fayrusta koroonaha. Tallaalladu si buuxda qofka ma uga difaacayaan in uu qaado ama dad kale sii qaadsiiyo fayrusta. Taas darteed waxa weli muhiim ah in lagu dhaqmo talooyinka ka hortagga is-qaadsiinta cudurka.

Cilladaha tallaalka

Inta badan cilladuhu waxay yimaadaan maalmaha u horreeya ee ku xiga tallaalka. Tallaallada koroonuhu waxay qofka ku keenaan cilladaha caadiga in ka badan inta ay keenaan tallaallada kale. Inta badan waxyaalaha la isku arko waa kuwo khafiif ama dhexdhexaad ah oo maalmo ka dib qofka ka tegaya, laakiin dadka qaar waxa ku yimaada cilladdo ama dhib xoog weyn. Cilladaha ku yimaada dadka yaryar ayaa inta badan ka xoog weyn inta ku timaada dadka waaweyn.

Dadka qaata tallaalka waxa intooda badan xanuunta meesha laga muday. Cilladaha kale ee caadiga ah waa daal, madax-xanuun, muruq-xanuun, qabow dareemid, kalagoys-xanuun iyo qandho/xummad. Cilladahan waxa inta badan la arkaa irbadda labaad ka dib.

Waa dhif iyo naadir in ay yimaadaan cillado aad u daran. Cilladaha dhif iyo naadirka ah waxa ka mid ah caabuq ku dhaca muruqa wadnaha (myokarditt) iyo caabuq ku dhaca xuubka ku dedan wadnaha (perikarditt). Cilladahan waxay inta badan dhacaan irbadda 2-aad ka dib waxaanay inta badan ku dhacaan dhallinyarada iyo dadka da'aadka dhexe ah. Cilladaha dhif iyo naadirka ah sida falcelinnada xasaasiyadeed ee daran iyo caabuqa ku dhaca wadnaha waa la daaweyn karaa haddii ay qofka ku dhacaan. La ma hubo in aanay jirin cillado dhif iyo naadir ah oo aan weli la ogaan, ama cillado soo bixi doona marka ay muddo ka soo wareegto markii la qaatay tallaalka.

Maxaan sameeyaa haddii cillado igu yimaadaan?

Haddii aad isku aragto calaamado dhibaato oo aanad filayn, xoog weyn ama wakhti badan soconaya waxa wacan inaad la xiriirto dhakhtar ama shaqaale caafimaad kale si loo qiimeeyo xaaladaada una heshid talooyin. Arrintani kuma xidhna in aad is leedahay tallaalka ayaa cilladda u sabab ah iyo in kale. Shaqaalaha caafimaadka waxa ku waajib ah inay soo sheegaan cilladaha waaweyn ama falcelinnada aan hore loo arkin ee ay ka shakisan yihiin in sababtoodu tahay tallaalka. Adiguna farriin ayaad soo diri kartaa adoo isticmaalaya [helsenorge.no](https://www.helsenorge.no)

Oggolaansho shuruudaysan

Tallaalkan fayrasta koroonada waxa lagu tijaabiyey daraasado waaweyn oo kumanaan qof la siiyey tallaalka. Daraasadaha waxa loo sameeyey si la mid ah habka tallaallada kale, laakiin muddada fiirsashada ayaa la soo gaabiyey. Hay'adaha dawooyinka ayaa tallaalka siiyey oggolaansho shuruudaysan. Taas oo macnaheedu yahay in hadda la hayo xog lagu ogaan karo in faa'idada tallaalku ka badan tahay halista tallaalka, laakiin weli soo-saaraha tallaalka waxa laga rabaa sii wadida daraasadaha isla markaana waa in hay'adaha dawladda ee dawooyinka si joogto ah loo siiyo xogta cusub ee la helo.

Tallaalladee ayaan qaatay?

Markaad qaadato tallaalka koroonada waxa laga diiwaangelinayaa Diiwaanka Tallaallada Qaranka ee SYSVAK. Macluumaadka waxaad ka helaysaa [helsenorge.no](https://www.helsenorge.no)

Ma rabtaa faahfaahin kale?

Weydii dhakhtarkaaga, kuwa ku tallaalay ama shaqaalaha caafimaadka. Isla markaana eeg barta Machadka Caafimaadka Dadweynaha: <https://www.fhi.no/kvp>